

Tallaalka kadhanka ah hergabka

Waxaad hadda fursad u haysataa inaad xaruntaada caafimaadka ka qaadato tallaalka bilaashka ah ee hergabka laga bilaabo Talaadada, Nofeembar 8, 2022. Waxaa dhici kartaa in xarumaha caafimaadka wadashaqeyn dhex marto si markaa aad tallaalka ugu qaadan karto goob kale ee aan ahayn xaruntaada caafimaadka ee joogtada ah.

Qaadashada tallaalkaaga, waxaa si fiican lagaaga difaaci doonaa hergabka laguula dhigi lahaa isbitaalka. Tallaalka waa in lagu celiyaa sanad kasta sababtoo ah ilaalinta difaaca waxa ay jirka kusii jireysaa kaliya lix bilood.

Dadka la siiyo tallaalka kadhanka ah hergabka ee bilaashka ah waxaa loo kala siiyaa sida ay u kala mudan yihiin ee hoose.

- Dadka 65 sano jirka ah iyo kuwa kasii weyn.
- Haweenka xaamilada ah kadib toddobaadka 12aad ee uurka. Haweenka xaamilada ah oo sidoo kalena kujira koox kale oo qabta halis caafimaad ayaa lagula talinayaa qaadashada tallaalka xitaa kahor toddobaadka 12aad ee uurka.
- Dadka waaweyn iyo carruurta laga bilaabo 6 bilood oo leh cudurada ama xaladahaan soo socda:
  - Wadna xanuun joogta ah
  - Cudurka joogtada ee sambabada ee COPD ama neefta daran/aan dageynin
  - Xaaladaha kale ee sababa hoos u dhaca shaqada sambabada ama qufaca oo daciifa iyo dheecaan fadhiisashada (tusaale ahaan, cayilka xad dhaafka, cudurada murqaha neerfaha ama naafo jireed oo badan)
  - Howl-gabida kelyaha ama beerka ee joogtada ah
  - nooca 1aad iyo nooca 2aad ee cudurka macaanka
  - oo ku lug leh nidaamka difaaca jirka oo si aad ah u yaraaday iyada oo ay sabab u tahay xanuun ama daaweyn.
- Isgaaritaanka qoyska ee dadka qaba nidaamyada difaaca jirka ee aadka u daciifka ah.
- Shaqaalaha ku sugan goobaha caafimaadka iyo daryeelka ee sida dhow ula shaqeyya bukaanka iyo kuwa qaadanaya daryeelka ee halista weyn ugu jira inuu soo gaaro hergabka halista ah.
- Dhammaan shaqaalaha ku sugan Gobolka Gävleborg laga bilaabo 21 Nofeembar.
- Laga bilaabo 5-ta Diseembar iyo wixi ka dambeeyo, kuwa kale waxaa la siin karaa tallaalka kadhanka ah hergabka.

Tallaalka kadhanka ah burukiitada ayaa laga helayaa xarumaha caafimaadka. Macluumaad dheeraad ah weydii xaruntaada caafimaadka.

Haddii aadan hubin inaad xaq uleedahay tallaalka bilaashka ah iyo inkale, waxaad la xariiri kartaa dhakhtarkaaga ama rugtaada caafimaadka.

Waxbadan ka akhri oo dhawr luuqadood ah: [www.1177.se/Gavleborg](http://www.1177.se/Gavleborg)

Haddii aad xanuunsato, wac 1177 Vårdguiden